Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Barlamaanka Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka Kalfadhiga 5-aad

Documentiga Kalfadhiga 5-aad Kulankiisa: 15-aad

Kalfadhiga 5-aad **TR: 6/12/2014**

Kulankiisa: 15-aad, sacada furitanka.10:30 gh, sacada xiritanka.1:16 gd.

Guntinta: 235 xildhibaan

Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Gunaanadka doodad iyo U Codeynta Motionka Kalsooni kala Noqoshada**

Xukuumadda.

Shir-Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane: Muxamed Sheekh

Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka Furey Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, waxaa lagu furey Aayadaha Qu'raanka kariimka uuna Akhriyay Xildhibaan: Sheekh Shaacir.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu xildhibaanada uu weydistay in ay ansixiy-an Ajendaha weyna ansixiyeen.

Guddoomiyaha Golaha ayaa xildhibaanada u sooj eediyay, xildhibaano dooda inta noo harsan ayaan bilaabeynaa.

Xildhibaan:Yuusuf Maxamed Cali, wuxuu soo jeediyay,waxaa bilowdey geedi socodkii aan ku shaqeyn la heynoo ah labada aragti ee Barlamaan ahan, waxaa cadaatay in Raisal Wasaaraha shaqadii loo idmadey uu ka soo bixiwayay, waxan oranlahaa Raisal Wasarahan ha boxo, Rai'salwasaare shaqeynayo hala keeno.

Khadiijo Maxamed Diiriye, waxey sheegtay,waxaan qabaa in Moshinka nuu xaqdaroyahay, mooshin waxaa laga keenaa waxqabadla'aan, waa in la weydiyaa wasiirada in xukuumada ay wax qabatay, Qodobka.100-aad ee Dastuurka ayaa Qeexayo awooda Raisal Wasaaraha, xildhibaanke qeexi kara hiigsiga 2016ka ma sheegi karnaa,waxan soo jedinaya inuu Raisal Wasaaraha is casilin uu si shaqeyo.

Xildhibaan: Ibraahim Isaaq yarrow,wuxuu soo jeediyay,waxaan ugu tacsiyeynayaa shacabka ku nool beydhabo oo lo geystey xasuuq fool xunoo ay u geystan arxanlawayalka, xildhibaanada xaqbay u leeyihiin in ay kenan mooshin anagoo xildhibaano iyo wasiiro ah ayan u tagnayRaisal Wasaaraha oo kuniri is casil.

Xildhibaan: CabdiLadhi Sanyare, wuxuu sheegey, mooshinkan wuxuu yalaa mudo bil ah waxa la kenay 6/11/2014, maantana waa 6/12/2014,waxan qabay in uu moshinka qaldanyahay, laakin waxaan ogaaday in uu xaqyahay moshinka uu Rai'salwasaaraha qaldanyahay.

Xildhibaan: Cabdulahi Abshirow, wuxuu soo jeediyay, in uu mooshinka xaqdaro yahay aniga iyo saaxibadey oo gaareyno 40 xildhibaan,waxaan ku heshinay in aan isaga baxno mooshinka inta kale waxan ka codsanaya in ay isaga baxan mooshinka kalsoonida aan siino xukuumada.

Xildhibaan: Cabdulahi Sh. Ismaacil, wuxuu sheegey,aniga mowqifkeyga waa in Raisal Wasaaraha mooshinka lagalan oqdaa si xukuumadda u siishaqeyso.

Xildhibaan: Kulalihi: wuxuu soo jeediyay,waxaan u dhaaranay Dastuurka, guddoo-miyaha ayaa afkiisa naga yiri mooshinkan waa siyaasadeesanyahay.

Xildhibaan: Maxamed Cabdi Yuusuf, wuxuu sheegey, waxaan ku dhaaraney kitaabka qur'aanka, waxaan u dhaaraney dalka iyo dadka waa in aan loo badelin colaad iyo cadawtinimo, Madaxweynaha isaga kuma dhaqmin Dastuurka

Madaxweynaha wuu nooyeray wuxuu noo sheegey in uu san rabin Rai'salWasaaraha, Madaxweynaha wuxuu rabaa wax walba in uu gacanta ku dhigo, mooshinkan waxaa laga soo abaa-bulay madaxtooyada, waxan soo jeedinaya in la diido mooshinkan.

Xildhibaan: Cabdiraxman Axmed Suge, wuxuu soo jeediyay, mooshinkan waa xaq

Rai'salwasaaraha marka la furey kalfadhigaan, wuxuu ku guuldareystay qaraaradii ka soo baxay Barlamaanka, ciidamada xooga meelaha ay xorayen waxba kama qaban, wuxuu la xisaabtami waayay wasaaradda maaliyadda, mushaarka ciidamada, shaqaalaha, waa in aad kalsonida kala laabatan.

Xildhibaan: Dr: Cimi Maxamuud, wuxuu sheegey, waa in aan ka hadalnaa arimaha xaqiiqada oo runta ah kalsoni raadinta intaa anugu baxeyno doorasho toos ah Rai'sal Wasaaraha waxaa keenay Madaxweynaha wa in dalka an u turnaa waa in shacabka an matalno u dadaalno qodobada la cuskaday ma wanaagsana.

Xildhibaan: Avvocato Daahir, wuxuu soo jeediyay, waxaa nahay xildhibaanadii mooshinka saxiixay waan taagersanahay,waa in loo codeyo waa in qaranka la badbadiyo, waa in qilaafka la soo afjaro maxayelay ma wanagsana laba qof oo iska soo horjeedo an ku dadaalno in uu Barlamaanka kala jabin.

Xildhibaan: Cabdulahi Bille Nuur, wuxuu sheegey, Rai'sal Wasaaraha marka la doortey wuxuu hortina ka balanqaaday in uu difaaca wax ka qabanayo xukumada

Adinka shaqada u idmatan maxaa ula xisaabtami weysan kuligiin waxaad tiraahden wasaarad hebel way fiicantahay, tan kale hadii wasaaradaha ay shaqey-nayaan maxaa loo casiley Qod.30-aad,Qod.100-aad, ayad adegsatan mar kasto waxaad u taagantihiin Xukuumada waa guuldareysatey ceeb ayay idinku tahay in ad mar walba mooshin keentaan.

Xildhibaan: Muuse Sheekh Cumar, wuxuu soo jeediyay, waxaan ahaa kuwa mooshinka saxiixay, markan arkey Rai'sal wasaaraha oo booqday xerada ugu weyn qaxootiga ee dhadhaab, waxaan go'aansaney in aan taagarno Rais'al wasaaraha, waxan ka xumahay 33 wasiir oo qortay mooshinka.

Xildhibaan: Khaliif Xaaji, wuxuu sheegey, cadaaladdaro laguma sheynkaro Rai'salwasaaraha shaqadii loo idmadey waa gudan waayay, maalintii uu dhisay golaha wasiirada ilaaiyo manta waxaa jiray qilaaf waa in sida ugu dhaqsiyaha badan kalsonida logala laabtaa.

Xildhibaanada: Yuusuf Dirir Cabdi, wuxuu soo jeediyay, Rai'salwasaaraha waxa kenay Madaxweynaha, inuu mar kasta yiraahdo Rai'salwasaarahan ma doonayo xildhibaano waxan idiin soo jeedinayaa in ayna Xukuumada bur-burin.

Intaa kadib Guddoomiyaha Golaha wuxuu u soo jeediyay, xildhibaano isiiya mudo

15 daqiiqo si aan u soo dhaariyo Howl wadeenada Golaha Shacabka.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu sheegey, sidauu qabo XeerHoosadka marka cod la qaadayo in la soo tiriyo Xildhibaanada Golaha fadhisa.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu soo jeediyay,markii kulanka furmayay wuxuu ku furmay 211 xildhibaan, hada waxaa golaha fadhiya 235 xildhibaan, waxa maqan 40 xildhibaan oo shaqo kumaqan,codeynta waxey ku meel mari kartaa 139 xildhibaan.

Codeyntii sidanayay u dhacday:

Intaogol in kalsoonida lagala laabto xukuumadda -------- 153 Xildhibaan

Inta diidan mooshinka xukuumada laga kanay--------80Xildhibaan

Intaka Aamustay ---------2 Xildhibaan

GuddoomiyahaGolahaShacabka Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan Jawari wuxuu soo jeediyay, Anigo ku hadlayo magaca golaha shacabka Madaxweynaha iyo Rai'sal Wasaaraha waa in ay qaadan talaabada ku haboon, in Madaxweynaha mudo 30 casho gudahooda uu soo magacabo Rai'sal wasaare cusub, iyadoo mudada harsan ay aad u yartahay, waa in Xogh'yaha guud uu gaarsiiyo Madaxweynaha, waxan u mahad celinaya xildhibaanada sida degan oo ay shaqadooda u gutan.

Shir Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane: Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu shir Guddoominayay kalfadhiga 5-aad kulankiisa:15-aad uu sheegay in uushirka xiranyahay sacada markey ahayd 1:16 gd.